## La Xiriirka Adeega Booliska Edmonton

Wac 9-1-1 xaaladaha deg-degga ah oo keliya

Xaaladaha aan deg-degga ahayn wac 780-423-4567

Mobilka: # 377

Dhago la,aanta ama dhago adeegga xagga maqalka: 780-425-123

Wixii intaa dheeraad ah, booqo: edmontonpolice.ca

Ku Xidhnow Warbaahinta Socialka


EDMONTON POLICE SERVICE

edmontonpolice.ca/KnowYourRights

## Markii uu ku joojiyo ama ku soo dhawaado sarkaal ka tirsan EPS, adigu

- Uma baahnid inaad ka jawaabto su'aalaha sarkaal booliis-ka ah. Macluumaad kasta oo aad la wadaagto waa ikhtiyaari/mutadawacnimo.
- Waxaa lagaa rabaa inaad is qeexdo haddii ay jiraan in wax shacri degmo ama gobal oo aad jabisay ay jiraan kuwaasoo u baahan bixinta ticket and xirid.
- Waad awooddaa guud ahaan inaad dhahdo maya marka police-ku ku waydiiyo inay baaraan alaabtaada haddii aan laguu soo xirin ama laguu soo qaban sababo la xiriira nabad-galyada.
- Waad bixi kartaa in lagu soo qabtay ama lagu soo xiray mooyee.
- Haddii lagu xiro ama lagu qabto, waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho qareen sida ugu dhakhsaha badan uuna sargaalka boolisku kuu siiyo meel private ah oo amman ah oo arrintaas ku samayso.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato magaca sarkaal booliis-ka ama lambarka calaamadda shaqadiisa
- Looma baahna inaad siiso ogalaanshaha galitaanka gurigaaga ilaa inay haystaan amar maxkamadeed maahane ama sabab deg deg ah oo ay ku gali karaan gurigaaga.
- Waxaad awoodaa inaad waydiiso copy cadaynta baaritaanka ee awoodda u siisay poblice-ka inuu galo gurigaaga.
- Waxaa lagaaga baahanyahay inaad dhiibto sharciga wadidda gaarigaaga, diiwaan galinta iyo caymiska haddii lagu joojiyo intaad wadid gaariga.
- Guud ahaan xaq uma lihid inaad la hadasho qareen kahor baaritaanka neefta.
- Waxaad u dacwoon kartaa madaxa booliiska, taliyaha guud ee booliiska amd edmonto police commission-ka haddii lagugu xad gudbo, laguula dhaqmo si aan cadaalad ahayn ama lagu xad gubo xuquuqdaada.

*Macluumaadkan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo macluumaad guud oo ku saabsan isdhexgalka qofka iyo sarkaal boolis. Ma aha sharaxaad dhameystiran oo ku saabsan dhammaan xuquuqda qofka. Macluumaadkani ma beddelayo talobixinta qareenka, kaasoo kusiin kara talo gaar ah u ah adiga iyo xaaladaada. Waa inaad xaaladahaaga kala tashataa qareenka. Haddii lagu xidho sargaalka boolisku wuxuu kuu sheegi doonaan waxaad xaq u leedahay, wuxuuna kusiin doonaan number bilaash ah oo aad wacdo iyo talo sharciyeed bilaasha ah iyo sidoo kale macluumaad kale oo ku caawinaya.*



# Ogow Xaqqaga

Tilmaamaha shaqsiga marka aad la macaamilayso askarta

EDMONTON POLICE SERVICE

## Masuuliyadaha Sarkaalka EPS iyo Xuquuqda Dadweynaha

Ka hortagga dembiyadu waxay muhiim u yihiin ilaalinta nabadgelyada bulshada. Doorka Adeegga Booliska Edmonton (EPS) waa inuu ilaaliyo nolosha, hantida, iyo nabad galyada bulshada iyo inuu ka hortago, ogaado uuna xilliyo danbiyada. Halk EPS aysan awoodin inay ka hortagto dambiyada iyadoo la kaashanaysa bulshada, hadafkeenu wuxuu noqdaa inaan baarno.

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dareemo amman. Aasaaska sharci ahaanta booliisku waa kalsoonida shacabka, haddii aan kalsooni jirin police-ku wuxuu noqonayaa mid aan wax tar lahayn oo aan shaqadiisa qabsan Karin. EPS waxay u baahanyihiin inay fahmaan dhibaatooyinka xaafadaha ayna si dhowna ula shaqeeyaan bulshada si looga hortago inaysan dhicin danbiyo iyadoo hadafku yahay hormarinta noolasha qof walba oo ku nool Edmonton.

Wada hadalada u dhexeeya qofka iyo sargaalka booliska waa muhiim maxaa yeelay waxay siinayaan EPS-ka macluumaad gacan ka geysan kara xallinta iyo ka hortagga dambiyada. Marka la wajaho isku dhac dhanka booliska ah, guud ahaan qofku wuxuu xor u yahay inuu baxo oo sii wato socodkiisa. Tani kama hor istaageyso sargaal-ka booliiska inuu isku dayo inuu qofka la hadlo, laakiin had iyo goor qofku xor ayuu u yahay inuu baxo ilaa sargaalka police-ku inuu hayo sabab uu ku xiro ama ku qabto mooyee.

Saraakiisha Booliiska EPS,waxay rabaan inay kala hawl galaan xubnaha dadwaynaha hadii ay u baahanyiin inay wax ka ogaadaan bulshooyinka ay u adeegaan. Tani waxay badanaa ku lug leedahay utagis qof iyo bilaabista wada hadal. Saraakiisha Booliiska EPS waxaa loo tababarey inay raacaan siyaasadaha ku dadaalaya inay hubiyaan cadaalada iyo dhex-dhexaadnimada.

Tusaale ahaan, warbixinta xiriirka sargaalka waxaa kaliya oo la samayn karaa haddii ay jiraan sababo cad cad oo laga yaabo inay sii fogeyaan baaritaan ama ka hortagga fal danbi, fawdo iyo dhibaataeyn.

Waa muhiim inaad ogaato waxa ay yihiin xuquuqahaagu, iyo sidoo kale waxa saraakiisha EPS doorarkooda iyo waajibaadkooduu yihiin marka aad la macaamilayso. Waxyaabaha soo socda ayaa loogu talagalay inay ku siiyaan macluumaad guud oo ku saabsan waxa ay tahay inuu sarkaal sameeyo, waxa ay tahay inaadan sameyn, iyo waxaad rabi lahayd inaad samayso xaaladaha ay bileysku ku lug leeyihiin.

## Marka sarkaal ka tirsan EPS uu ku istaajiyo ama kuu yimaado si uu kuula hadlo, waa inuu:

- Isu kaa sheegaa
- Kuu sheegaa sababta laguu joojiyay ama u jeedada uu rabo inuu kaala hadlo.
- Hadii lagu xiray ama lagu qabtay waa inuu kuu sheegaa sababta.
- Waa inuu kugu waaniyaan inaad lahadli karto qareen hadii lagu xiro kuna siiya fursad aad arintaa ku sameyn kartid si hoose oo ammaan ah.
- Ku fasaxaa haddii aan lagu xirin ama lagu gayn xarunta bilayska.
- Ku siiyaa koobiga waaranka baadhitaanka haddii loo soo sharciyeeyey inuu ku baaro adiga ama gurigaaga.
- U dhaqmaa si macquula oo xushmad leh xilliga baadhitaanka.
- In uusan adeegsan xoog xad dhaaf ah ama burburin hantidaada sabab la'aan
- Kuugu soo celiyaa Hantidaada muddo saddex bilood gudahood ah haddii qaadashada hantidaadu qayb ka ahayd baadhitaanka oo aan lagugu soo xukumin dambi. Marka baadhitaanku qaato mudo ka badan saddex bilood, sarkaal booliis-ka ah wuxuu u baahanya hay inuu ogalaansho ka soo qaato xaakimka inuu hantidaada hayn karo mudo saddex bil ka badan.